Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta Rasmiga ah

الرسمية الجريدة

Official Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 10aad** **Muqdisho, 31 OCTOBER 2023** **Lr. 2**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**FAAFIN BILAHA SOO BAXAY**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

## BILAHA

## APRIL - OCTOBER

# 2023

Tariikh: 17/08/2023

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.137**

**XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA MAAREYNTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DOWLADDA.**

XRW - BIXIT
29 AUG 2023
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **MOF/OM/1012/2023** ee ku taariikheysan Agoost 16,2023 kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.43.08.23** ee **17/08/2023,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.43.08.23 ee 17/08/2023,** kuna saabsan ansixinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda.

## Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO : HAN-070-23
TAARIIKH : 06-09-2023
SAXIIX :
AVV. Ahmed Isse Gutale
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

# WASAARADDA MAALIYADDA

***Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda***

***Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Maaliyadda 2023***

**TUSMO**

*QAYBTA KOWAAD*-------------------------------------------------------------------------------1

**MABAADI'DA GUUD EE MAAREYNTA HANTIDA DAWLADDA**---------------------------1

Qodobka 1aad: Ujeeddada iyo Baaxadda------------------------------------------------------1

Qodobka 2aad: Qeexid-----------------------------------------------------------------------1

Qodobka 3aad: Kaalinta iyo Mas'uuliyadda-----------------------------------------------2

*QAYBTA LABAAD*-------------------------------------------------------------------------------4

**DIIWAAN-GELINTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DAWLADDA----------**4

Qodobka 4aad: Diiwaan-gelinta Hordhaca ah ee Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda ....................................................... 4

Qodobka 5aad: Sumadeynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda .......................... 6

**QEYBTA SADDEXAAD**-------------------------------------------------------------------------6

**MAARAYNTA HANTIDA DANTA GUUD**-----------------------------------------------------6

Qodobka 6aad: Soo-iibsiga Hantida Danta Guud ........................................................... 6

Qodobka 7aad: Dayactirka Hantida Danta Guud.............................................................. 7

Qodobka 8aad: Kirada iyo Heshiisyada Dheef-wadaagga (Concessions) ee Hantida Danta Guud.......................................................................................................... 9

Qodobka 9aad: U kala Wareejinta Hanti Dan Guud ama Agabka Laba Hay'ad Dawladeed 10

Qodobka 10aad: Burburinta Agabka Dawladda-----------------------------------------------11

Qodobka 11aad: Ka tirtirida Agabka La-burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka-----------12

Qodobka 12aad: Xisaabinta iyo Ka-warbixinta-----------------------------------------------13

**QEYBTA AFARAAD**---------------------------------------------------------------------------14

MAAREYNTA AGABKA DAWLADDA-------------------------------------------------------------14

Qodobka 13aad: Maareynta Gaarka u ah Agabka Dawladda------------------------------------14

Qodobka 14aad: Soo Iibsiga Agabka---------------------------------------------------------15

Qodobka 15aad: Kaydinta Agabka Dawladda-------------------------------------------------16

Qodobka 16aad: Habka Xaqiijinta iyo Hubinta Agabka--------------------------------------17

Qodobka 17aad: Maareynta Agabka Dawladda-----------------------------------------------17

Qodobka 18aad: Dhaqan-gal-----------------------------------------------------------------18

## QAYBTA KOWAAD

## MABAADI'DA GUUD EE MAAREYNTA HANTIDA DAWLADDA

### Qodobka 1aad:
### Ujeeddada iyo Baaxadda

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu talo-galay in lagu hago maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda ee ku qeexan Qodobka 3(12), Qodobka 50aad iyo 51aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda.
2. Xeer-nidaamiyahan wuxuu kaabayaa, islamarkaana lala akhrinayaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada markay taariikhdu ahayd 19/05/2022 (Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 140).
3. Xeer-nidaamiyahaan waxaa lagu dabaqaya si gaar ah, maareynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay ka mid yihiin hantida guurtada ah, midda maguurtada ah iyo agabka (inventories) Hay'adaha Dawladda.

### Qodobka 2aad:
### Qeexid

1. Ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:
   (b) **"Hantida Danta Guud":** Waxaa loola jeeda hantida ku xusan faqradda (2) ee Qodobka 50aad iyo 51aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019.
   
   (t) **"Agabka Dawladda":** Waxaa loola jeeda hantida guurtada ah oo ay Dawladdu leedahay oo ay ku jiraan balse aan ku koobneyn, dhammaan mishiinnada nuucyadooda kala duwan, gaadiidka, qalabka elegtarooniga ah, mishiinnada iyo qalabka warshaddaha, alaabta xafiiskayada, xoolaha nool, saadka, hantida dhextaala dhismayaasha Dawladda oo ay leedahay Dawladdu una isticmaasho fulinta adeegyada iyo hanti kasta oo kale oo guurta ah ee uu Wasiirku ku qeexo wareegto.
2. Erey kasta oo kale oo lagu dhex isticmaalo Xeer-nidaamiyahan ee aan lagu qeexin Xeer-nidaamiyahan laakiin lagu qeexay Sharciga ama Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda ee 2022, wuxuu yeelanayaa macnaha lagu siiyay halkaas.
3. "**Sharciga**": waxaa loola jeedaa "Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019"

## Qodobka 3aad:
## Kaalinta iyo Masuuliyadda

1. Wasiirku wuxuu dhisayaa Guddiga Hantida Danta Guud oo uu guddoomiye ka yahay isagu, kaasoo hawshiisu tahay dib-u-eegista iyo ka-talo-bixin arrin kasta oo saamaynaysa maamulka Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda.

2. Si waafaqsan Qodobbada 8aad iyo 9aad ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, Wasiirku wuxuu mas'uul ka yahay:

   (b) Soo-saarista hagayaasha maaraynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, si loo hubiyo in dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda loo ilaaliyo, loona diiwaan-geliyo, loona xisaabiyo, isla markaana looga soo warbixiyo sida uga habboon.

   (t) Samaynta nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo la shaqayn kara Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

   (j) Ansixinta codsiyada ka yimaada Hay'adaha Dawladda ee saamaynaya maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda.

   (x) La-socodka, kormeerka iyo kor-joogtaynta hantida danta- guud iyo agabka Dawladda.

3. Si waafaqsan Qodobka 10aad ee Sharciga, Xisaabiyaha Guud ayaa mas'uul ka ah:

   (b) Soo-saarsita, isagoo la tashanayo Waaxda Hantida Qaranka iyo midda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, hab-raac ku aaddan kala-soocidda hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyo dejinta Jaan-tuusyada Xisaabaadka (codes on the Charts of Accounts) oo muujinaya noocyada hantida danta- guud iyo agabka Dawladda si loogu adeegsado diiwaan-gelinta, kaydinta iyo ka- warbixinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (t) Soo-saarita, isagoo la tashanaya Waaxyaha Hantida Qaranka iyo Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, hage muujinaya mabaadi'da xisaabaadka iyo hababka loo xisaabinayo qiimaha, qiimo-dhaca iyo khasaaraha ku yimaada hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (j) Isagoo tixraacaayo diiwaannada ku jira gacanta Waaxda Hantida Qaranka, isku geynta iyo ku muujinta warbixinta xisaab xirka (balance sheet) qiimaha hantida danta-guud iyo agabka Dawladda JFS.

   (x) Dhammaan hagayaasha iyo hab-raacyada uu soo saaro Xisaabiyaha Guud si waafaqsan faqrada (3) ee qodobkan, waa inuu ansixiyaa Wasiirka ka hor inta aan la hirgelin.

4. Sida ku cad Qodobka 8aad (3) ee Sharciga, Wasiirka ama sarkaalka Wasaaradda ka tirsan ee Wasiirku u wakiishay si waafaqsan Qodobka 26aad (1) ee Sharciga, ayaa masuul ka ah dib-u-eegista qorshaha maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay Hay'adaha Dawladdu soo raaciyaan soo jeedinta miisaaniyada, si uu ugala taliyo inay waafaqsan tahay Qorshaha Maaliyadda ee Muddada Dhexe iyo in kale.

5. Si loo hubiyo in si hufan loo maareeyey hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay gacanta ku hayso Hay’adda Dawladeed, Sarkaalka Idman ee hay'addas Dawladeed, si waafaqsan Qodobka 12aad (2) ee Sharciga, ayaa mas’uul ka ah:

   (b) Hubinta in si hufan loo isticmaalo hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, lagana ilaaliyo dayac iyo burbur;

   (t) Inuu ka ilaaliyo in hantida danta-guud iyo agabka Dawladda si xun loo isticmaalo;

   (j) Inuu kormeero isticmaalka iyo xaaladaha ay ku sugan yihiin hantida danta-guud iyo agabka Dawladda;

   (x) Inuu diyaariyo qorshaha maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyofulinta dayactirka hantida iyo agabka;

   (kh) Inuu sameeyo diiwaan si joogta ah loo cusbooneysiiyo oo lagu kaydiyo dhammaan xogaha hantida danta-guud iyo agabka Dawladda, lana wadaago Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda warbixinno ku saabsan nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda iyo xaaladaha ay ku sugan yihiin.

6. Si loo xaqiijiyo gudashada waajibaadka shaqo ee loo idmaday Wasiirka si waafaqsan Qodobka 8aad (3) ee Sharciga, isla markaasna maanka lagu hayo mabda'a wakaalasho awood shaqo ee ku xusan Qodobka 26aad (1) ee Sharciga, ayaa Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyadda loo xilsaaray ilaalinta iyo isku-dubbaridka maamulka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda JFS. Waaxdu waxay mas’uul ka tahay:

   (b) Horumarinta iyo dhaqan-gelinta shuruucda, xeerarka, hagayaasha iyo nidaamyada kale ee lagu maareeyo hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (t) Maamulidda nidaamka maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (j) Kaydinta iyo joogtaynta diiwaan dhameystiran ee dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (x) Oggolaanshaha codsiyada uga yimaada Hay'adaha Dawladda ee diiwaan-gelinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (kh) Usoo-jeedinta Wasiirka inuu ansixiyo is-bedel kasta ee lagu samaynayo maaraynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn soo iibsashada, kireynta, wareejinta iyo iska-iibinta.

   (d) Kormeeridda, la socodka iyo fulinta baarista iyo xaqiijinta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (r) Kormeeridda, la socodka iyo kor-joogtaynta dayactirka hantida danta-guud iyo agabka ku jira gacanta Hay’adaha Dawladda.

(s) Dib-u-eegista iyo bixinta talooyinka ku saabsan qorshayaasha maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn go'aan ka qaadashada isticmaalka, kiraynta ama bixinta heshiisyada dheef-wadaagga ah (concession) ee hantida danta guud iyo qorshaha dayactirka.

## QAYBTA LABAAD

## DIIWAAN-GELINTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DAWLADDA

### Qodobka 4aad:
### Diiwaan-gelinta Hordhaca ah ee Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda

1. Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda waa in ay samaysaa oo ay kaydisaa diiwaan dhamaystiran (Item Master) ee hantida ma-guurtada iyo guurtada ah ee Dawladda JFS, sida dhulka, guryaha, dhismayaasha, gaadiidka iyo qalabka, kuna kaydisaa xogtaan Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).
2. Hal sano gudihiis marka la soo saaro Xeer-nidaamiyahan, Hay'ad kasta oo Dawladeed waa in ay Diiwaanka Hantida Qaranka ee Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), gelisaa xogta loo baahan yahay iyo macluumaadka hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo ay maamusho, mas’uulna ka tahay. Diiwaanka Hantida Qaranka ee dhammaan Hay'adaha Dawladda ee Dawladda JFS, ayaa loo tix-gelinayaa diiwaanka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda ee midaysan.
3. Hanti danta-guud ama agabka Dawladeed ee kasta ee ku jira Diiwaanka Hantida Qaranka waa in laga hayo xogta soo socota:
   (b) lambar aqoosi oo u gaar ah (Unique ID) hantidaas danta-guud ama agabkaas Dawladda.
   (t) Nooca hantida danta guud iyo agabka Dawladda uu yahay oo ku salaysan Jaantusyada Xisaabaadka (codes on the Charts of Accounts) ee u dajiyay Xisaabiyaha Guud.
   (j) Magaca hantida danta-guud ama agabka Dawladda.
   (x) Xogta goobta ay taalo hantida danta-guud ama agabka Dawladda, oo ay ku jiraan macluumaad faahfaahsan iyo xogta cayiman ee goobta (geo information), haddii ay dhacdo in hantidu tahay hanti ma-guurto ah oo qiima leh.
   (kh) Taariikhda Dawladdu yeelatay;
   (d) Hay’adda Dawladda ee gacanta ku haysa hantida danta-guud ama agabka Dawladda.
   (r) Qiimaha Dawladdu ku soo iibsatay;
   (s) Muddada ay jirayso oo ay waxtarka leedahay ee Xisaabiyaha Guud uu jideeyay;

(sh) Sida ay u qiima dhacayso ama ay u noqonayso dhaqan-ka-bax ee u jideeyay Xisaabiyaha Guud;

(dh) Diiwaanka kormeerka iyo xaqiijinta (the inspection or verification log);

(c) Diiwaanka dayactirka oo ay jidaysay Waaxda Hantida Qaranka;

(g) Macluumaadka kirada iyo heshiiska haddii hantida danta-guud ay tahay mid kireysan ama lagu bixiyay heshiis dheef-wadaag ah; iyo

(f) Macluumaadka iibinta ama dhaqan-ka-baxa haddii agabka Dawladda la iibiyey ama uu noqday dhaqan-ka-bax,.

4. Haddii Hay'ad Dawladeed ay ku guul daraysato in ay diiwaan-geliso xogta ku saabsan hantida danta-guud ama agabka Dawladda oo ay iyadu gacanta ku hayso xiliga kama dambaysta ee lagu qeexay farqada (2) ee Qodobkan, Waaxda Hantida Qaranka oo ogolaansho ka helaysa Wasiirka, waxay:
   (b) Diiwaan-gelinaysaa hantida danta-guud ama agabka Dawladda iyadoo hantidaas ku suntaysa Hay'adda Dawladda ee mas'uulka ka ah; ama
   (t) Ku-wareejinaysaa hay'ad kale ee Dawladeed, hantidaas danta guud ama agabkaas Dawladda ee kujira gacanta hay'adda ku guuldaraysatay inay diiwaan-geliso.
5. Marka la dhammeeyo diiwaan-gelinta hordhaca ah ee hantida danta-guud ama agabka Dawladda ee ku xusan farqadaha (2) iyo (3) ee Qodobkan, dhammaan Hay'adaha Dawladdu waa inay xaqiijiyaan in dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda ee magacooda lagu suntay inuu yahay mid si sax ah u diiwaan-gashan. sidoo kale, Hay'addaha Dawladdu waa inay muddo laba toddobaad gudihiis ah ku geliyaan Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) xogta hantidaa danta-guud ama agabkaa Dawladda kadib:
   (b) Mar kasta ay soo saaran rasiidka helitaanka agabka (GRN) ee agab dhawaan soo galay gacanta Dawladda ama shahaadada dhammaystirka dhismaha ee la xariirta hantida danta-guud;

   (t) Marka hanti dan-guud ama agab Dawladeed uu gacanta Dawladda ku soo galo deeq ahaan, mucaawino ama uu kadhasho dhamaystirka mashruuca; iyo

   (j) Marka is-beddel lagu sameeyo hanti dan-guud ama agab Dawladeed oo horayu jiray.

## Qodobka 5aad:
## Sumadeynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda

1. Inta lagu guda jiro diiwaan-gelinta hordhaca ah, haddii hanti danta-guud ama agab Dawladeed aan lagu suntin Hay'ad Dawladeed, hantidaas ama agabkaas waxaa maamulaya Waaxda Hantida Qaranka, waxaana lagu suntaa Wasaaradda Maaliyadda.
2. Waaxda Hantida Qaranka waxay soo jeedin kartaa in hanti dan-guud ama agab Dawladeed oo aan ku suntaneyn wax hay'add Dawladeed ah, lagu sunto, lana hoos keeno hay'ad Dawladeed iyadoo lagu salaynayo:

   (b) Sooyaalka ama hab-dhaqanka la xiriira gacan ku haynta iyo maareynta hantida danta-guud ama agabka Dawladda ee noocaan ah.

   (t) Adeegyada danta-guud ee bixintooda ay hay'adaha Dawladda u adeegsanayso hantida ama agabka.

   (j) Baahiyaha ay Hay'ad Dawladeed u qabto hantida danta-guud ama agabka Dawladda si ay u gudato kaalinteeda iyo waajibaadkeeda shaqo.

   (x) Kaalinta iyo mas'uuliyadda ay Hay'ad Dawladeed iska saari karto ilaalinta iyo maaraynta hantida danta-guud ama agabka Dawladda iyadoo lagu salaynayo nooca ay tahay hantida danta-guud ama agabka Dawladda.

## QEYBTA SADDEXAAD

## MAARAYNTA HANTIDA DANTA GUUD

## Qodobka 6aad:
## Soo-iibsiga Hantida Danta Guud

1. Si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeerarkiisa, haga-yaashiisa iyo Hagaha Hantida Danta-guud ee dhaqan galka ah, Hay'adaha Dawladda waa in ay diyaarsadaan qorshaha soo iibsiga hantida danta-guud, si loo waafajiyo qorshe sanadeedkeeda iibka iyo soo jeedinta miisaaniyadda.
2. Dhammaan kharash-bixinta, ha ahaado kharashka joogtada ah ama midka ra'sumaalka ee lagu soo gadayo hanti dan-guud oo cusub waa in lagu soo jeediyaa, laguna daraa Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.
3. Codsi kasta oo lagu dalbanayo hanti dan-guud waa inay weheliso warbixin kooban ee habka lagu doortay, qiimaynta dhaqaale, khatarta jirta, soojeedin ku aadan nidaamka haboon in lagu soo gado hantida noocaan ah iyo miisaaniyadda lasoo jeediyay ee ku filan, kadibna loo dira Waaxda Miisaaniyadda. Marka ay hesho macluumaadka hore ku xusan, Waaxda Miisaaniyaddu waa in ay kala tashato:

(b) Haddii arrinku uusan aheyn mashruuc, Waaxda Hantida Qaranka si ay u hesho talooyin dheeraad ah oo lagu biirin karo soo iibsiga hantida cusub. Waaxdu waxay tallooyin ka dhiiban kartaa:

i. Jiritaanka hanti dan-guud oo lagu wareejin karo ama la siin karo hay'adda doonaysa hantida.

ii. Sidda ay Hay'adda Dawladeed ee codsiga keentay ay ugu hoggaansan tahay shuruucda, xeerarka iyo hagayaasha dhaqan-galka ah ee la xiriira maareynta hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

(t) Wasiirka, haddii hawsha soo gadashada hantida ay u baahantahay kharash ra'sumaal ama ay tahay maal-gelinta mashruuc guud.

4. Dhammaan hababka loo marayo soo gadashada hantida danta-guud waa in ay waafaqsan yihiin Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeerarkiisa, hageyaashiisa, shuruucda iyo xeerarka kharash bixinta.

5. Hanti kasta oo ay Hay'adda Dawladeed ku hesho sifo deeq, hibayn ama laga maal-geliyey dibadda waa in loo aqoonsadaa inay tahay hanti dan guud waana in lagu qoraa Diiwaanka Hantida Qaranka, iyadoo la xusayo qiimaha hantidaas ku fadhido.

6. Kharashka lagu beddelayo hanti ku jirta gacanta Dawladda waa in loo xisaabiyaa kharashka lagu soo gadayo hanti cusub iyo midka la iska iibinayo hanti duugowday. Waaxda Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud waa in macaamilka noocaan ah ugu kala muujiyaan miisaaniyadda iyo diiwaannada xisaabaadka inay kala yihiin kharash iyo dakhli si waafaqsan miisaaniyadda iyo diiwaannada xisaabaadka.

7. Marka la ansixiyo foojarka kharashka ku baxaya gadashada hantida ama shahaadada dhamaystirka iibka la galiyo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa in Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si toos ah hantida danta guud ama agabka Dawladda ee cusub uga diiwan-geliyaa Diiwaanka Hantida Qaranka ama uu ku sunto hay'adda Dawladda ee kharashka gashay.

## Qodobka 7aad:
## Dayactirka Hantida Danta Guud

1. Hay'adda Dawladeed ee mas'uul ka ah hantida waa in ay si joogto ah u samaysaa hubin iyo dayactir ku aadan hantida danta guud. Waa in hay'addu sidoo kale hantida danta-guud oo ay gacanta ku hayso ee lagu suntay ku ilaalisa xaalad wanaagsan, si loo xaqiijiyo waxtarkooda, loona kordhiyo cimrigooda. Hay'adda Dawladeed ee mas'uul ka ah hantida waa in ay:

(b) Sameysaa jadwal dayactireed ee dhammaan hantida danta-guud ee qeexaya inta jeer ee la dayactirayo iyo baaxadda hawlaha dayactirka ee loo baahan yahay.

(t) Kaydisaa diiwaannada dhammaan hawlaha dayactirka oo ay ku jiraan taariikhda, faah-faahinta dayactirka la qabtay, iyo shaqaalaha mas'uulka ka ah dayactirka.

(j) Usoo bandhigtaa baaris marka laga codsado, diiwaanada dayactirka oo ay kaydisay.

2. Hay'adda Dawladeed waa inay si joogto ah u fulisaa dayactir kahor taga, si loo ogaado, loona dayactiro arrimaha u baahan dayactirka inta aysan noqon kuwa aan waxba laga qaban karin. hawlaha dayactirka kahor-taga ah waxaa ka mid ah saliidaynta, toosinta (calibration), iyo nadiifinta. balse kuma xadidna baaritaannada, Cilad kasta oo lagu ogaado inta lagu jiro hawlaha dayactirka kahor-taga ah waa in si degdeg ah wax looga qabtaa.

3. Hay'adda Dawladeed waa in ay si joogto ah u qaado dayactir lagu xallinayo arrimaha u baahan dayactir ee la soo ogaaday inay u baahnyihiin dayactir ama in isbedel lagu sameeyo. Isbedallada larabo in lasameeyo waa in loo maraa nidaamka uu jideeyay Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka. Hawlaha dayactirka ee keeni kara in hawlaha hay'adda joogsadaan waa in loo qorsheeyaa si maangal ah, si loo yareeyo caqabadaha ku imaan kara adeega iyo hawl-gallada hay'adda.

4. Dayactirka deg-degga loogu baahdo waa in si dhakhso ah loo sameeyaa, oo walxaha ay lagama maarmaanka tahay in la beddelo waa in loo helaa sida ugu dhakhsaha badan ee suurto-galka ah, iyadoo la raacayo Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka.

5. Hawlaha dayactirka waa inay qabtaan shaqaale aqoon, tababar iyo khibrad ku habboon u leh shaqada.

6. Iyadoo la la tashanayo Waaxda Hantida Qaranka, Sarkaalka Idman ee Hay'adda, Agaasimaha Miisaaniyadda iyo Xisaabiyaha Guud waa in ay hubiyaan in la kala saaro kharashaadka joogtada ah iyo midka ra’sumaalka marka la dajinayo miisaaniyadda kharashka dayactirka.

7. Kharashaadka dayactirka joogtada ah waa in lagu daraa kharashka loo isticmaalayo agabka iyo adeegyada halka kharashka dayactirka ra’sumaalka lagu darayo kharashaadka ra’sumaalka oo loo badalayo laguna daro qiimaha hantida qaranka ee dib loo cusboonaysiiyey ee ku jirta Diiwaanka Hantida Qaranka.

8. Dayactirka buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda waa in loo aqoonsada dayactir ra’sumaal:

(b) Marka hantida danta-guud lagu sameeyo dayactir iyo dib-u-habayn ka dhigaysa hantidaas sidii mid cusub.

(t) Marka lagu daro ama laga bedello qayb muhiim ah hantida danta-guud.

(j) Marka hantida danta-guud loo yeelo isticmaal cusub.

(x) Marka la balaariyo awoodda hantida danta-guud.

(kh) Marka la balaariyo awoodda qaab-dhismeedka ee hantida danta-guud.

(d) Marka la kordhiyo cimrigeeda waxtarka leh ee hantida danta-guud.

9. Saddex bilood gudahood marka la soo saaro wareegtada miisaaniyada, hay'adda Dawladda ee mas'uulka ka ah hantida danta-guud ama agabka Dawladda waa in ay diyaarisaa qorshaha dayactirka hantida kaas oo muujinaya wax ka qabashada arrimaha ay ka mid ka yihiin burburka. Waa in loo diraa qorshahaan Waaxda Hantida Qaranka si ay dib-u- eegis ugu sameeyan una ansixiyaan. Markii ay soo gaarto, Waaxda Hantida Qaranku waxa ay:

(b) Waaxda Miisaaniyadda kala tashanaysaa qorshaha dayactirka gaar ahaan arrinta qorshaha dayactirka ra'sumaalka.

(t) Dib u eegis ku sameeynaysaa qorshaha dayactirka si ay talooyinka ku haboon uga dhiibato. Hay'adda Dawladeed ee hantida ka mas'uulka ah waa inay tix-gelisaa tallooyinka la siiyay marka la diyaarinayo, lana fulinayo Miisaaniyadda.

10. Iyada oo la raacayo hageyaasha iyo tilmaamaha uu soo saaro Wasiirka, dhammaan diiwaannada dayactirka hantida danta guud ama agabka Dawladda ee ku suntan hay'ad Dawladeed waa in lagu kaydiyaa Diiwaanka Hantida Qaranka, walibana laga arkaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

11. Hay'adda Dawladda waa inay gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), sumada hantida danta-guud iyo faahfaahinta dayactirka lasameeyay, si loo abuuro foojarka kharash-bixinta la xiriirta hantidaan. Xogtaan waa in sidoo kale lagu diiwan-geliya Diiwaanka Hantida Qaranka si loo muujiyo qiimaha ku kacay dayactirka.

## Qodobka 8aad:
## Kirada iyo Heshiisyada Dheef-wadaagga (Concessions) ee Hantida Danta Guud

1. Khidmada iyo kharashka laga helo kireeynta iyo isticmaalka hantida danta-guud waa in loo maareeya si waafaqsan nidaamyada lagu dajiyay Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Hay'ad Dawladeed waxa ay kireyn kartaa hantida danta-guud ee magaceedu ku suntan yahay marka ay oggolaansho qoraal ah ka hesho Wasiirka Maaliyadda iyadoo loo maraayo shuruucda dalka. Heshiis kasta ee ku aadan kiraynta hanti dan-guud oo ay gasho Hay'ad Dawladeed iyada oo aan oggolaansho qoraal ah ka helin Wasiirka Maaliyadda waa waxba kama jiran.

3. Haddii aan laga dhaafin iyadoo la racaayo Hagaha Maareynta Hantida Danta-guud, hanti dan- guud kasta ee la kireeyo waxaa laga rabaa lacag kiro ah, taas oo loo

aqoonsanaayo dakhli aan aheyn canshuur. Dakhligan waxa si waafaqsan shuruucda dakhliga iyo maareynta maaliyadda guud usoo uruurinaya Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda.

4. Si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka, codsiyada ku aadan gelista heshiisyada dheef-wadaaga (concessions) ee hantida danta-guud waa in loo gudbiyaa Waaxda Farsamada ee Bixinta Qandaraasyada si ay qiimeyn ugu sameeyso, kadibna loo diro Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada si loo ansixiyo.

5. Wasiirka ayaa ku qeexaya hagaha maareynta hantida danta-guud shuruudaha iyo mabaadi'da la rabo inay ku jiraan heshiisyada kireynta iyo heshiisyada dheef-wadaaga ee hantida danta-guud (concession agreement).

6. Haddii hantida danta-guud ay soo saarto dakhliyo ay ka mid yihiin khidmadda kirada, lacagaha ka soo baxa heshiisyada dheef-wadaaga ee hantida danta-guud (royalties) iyo khidmadaha iyo kirooyinka kale, waa in Sarkaalka idman ee Hay'adda Dawladda ee hantidaas ku suntantahay:

   (b) Ku dara odoroska dakhliga dhammaan dakhliga ka soo xarooda hantidaas si loo tixraaco marka la sameeynayo qoondada miisaaniyadda iyo saadaasha lacagta caddaanka ah;
   (t) Hubiyo in Agaasinka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda uu ururiyo dakhliga soo xarooda, iyadoo loo marayo nidaamka dakhli ururinta ee ku xusan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, si taas loo fududeeyo, waa in lala wadaaga Wasaaradda Maaliyadda, heshiisyada kirada, dheef-wadaagga (concessions) ee hanti danta guud iyo dukumintiyada kale ee lama-huraanka u ah ururinta ujuurooyinka iyo khidmadaha kale ee ka soo xarooda hantida danta-guud;
   (j) Hubiyo in dakhliga ku soo xarooday habka elegtaroonig ah si toos ah loogu shubo Xisaabta Khasnada Mideysan, iyadoo la isticmaalaayo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa in lala wadaago Xisaabiyaha Guud iyo Hanti Dhoowraha Guud dhammaan cadaymaha lacag bixinta; iyo
   (x) Inuu ku sunto dakhliga hay'adda uu ku soo xarooday, isagoo isticmaalaya Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), si loo fududeeyo ururinta dakhliga, lana cadeeyo meesha uu ka soo xarooday dakhligaan, si kor loogu qaado hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.

## Qodobka 9aad:
## U kala Wareejinta Hanti Dan Guud ama Agabka Laba Hay'ad Dawladeed

1. Mar kasta oo la kala wareejinayo hanti dan-guud ama agab Dawladeed waa in ay:

   (b) Hay'ad Dawladeed ka codsata Waaxda Hantida Qaranka ama ay wareejintu iskeed ay u bilawdo Waaxda Hantida Qaranka;

(t) Waa in codsiga kor lagu xusay loo gudbiyaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda si uu faallo iyo talo uga bixiyo; iyo

(j) Waa in loo gudbiyaa Wasiirka si uu u ansixiyo codsiga oo ay ku lifaaqanyihiin talada Waaxda Hantida Qaranka iyo Agaasimaha Guud.

2. Waaxda Hantida Qaranka ayaa hanti danta-guud u kala wareejin karta hay'addo Dawladeed iyadoo cuskanaysa sababaha soo socda:

(b) Baahida ay hantida u qabto hay'adda Dawladeed ee hantida loo wareejinayo iyo shaqada ay dadwaynaha ugu qabanayso;

(t) Hay'adda Dawladeed ee hantida laga wareejinayo oo aan u hoggaansanayn Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, xeer-nidaamiyaashiisa iyo hagayaashiisa ku aaddan maareynta hantida danta guud.

(j) hay'adaha Dawladeed ee hantida loo kala wareejinayo oo la yimaada heshiis wadajir ah.

3. Waaxda Hantida Qaranku waa in xogta hantida kala wareejinta la ansixiyay gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) markay hesho warbixinta qiimeynta saxda ah ee xaaladda hantidu ku sugan tahay iyo midda kala wareejinta hantida.

4. Iyadoo mar kasta loo hoggaansamaayo Xeerka Qoondada Miisaaniyadda Qaranka, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo xeer-nidaamiyaashiisa, qarashaadka miisaaniyadeed ee loo qoondeeyay hantida la wareejiyay waa in lala wareejiyo isla hantida.

## Qodobka 10aad:
## Burburinta Agabka Dawladda

1. Agabka Dawladda waxaa la burburin karaa oo keliya haddii:

(b) Aan loo baahnayn in adeeg loogu sii qabto bulshada ama danta-guud;

(t) Ay noqdeen wax'aan la adeegsan karin (unserviceable); iyo

(j) Uu dhamaaday muddadii waxtarka uu lahaa.

2. Agabka Dawladda waxaa lagu khaarajin karaa:

(b) In la iibiyo, haddii agabka aan loo sii baahnayn isticmaalkiisa; iyo

(t) In la burburiyo, haddii aqabku aanu laheyn wax rajo ah oo lagu iibin karo ama lagu wareejin karo.

3. Waaxda Hantida Qaranku waa inay usoo gudbisaa codsiga burburinta Wasiirka si uu ansixiyo, marka la dhammeeyo hawsha khaarajinta, agabkuna ka baxo gacanta

Dawladda, Waaxda Hantida Qaranku waa inay agabka la burburiyey ku wargelisaa Xisaabiyaha Guud iyo Hanti-dhoowraha Guud ee Qaranka si uu uga saaro Diiwaanka Hantida Dawladda.

4. Ka hor inta aan la iibin agab Dawladdeed, waa in dib-u-qiimeeyn lagu sameeyaa agabka, si loo dejiyo qiimaha ugu yar ee lagu shaacin karo iibintiisa si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka. Hay'adda Dawladeed ee iska iibinaysa agabka waa in ay qiimaha agabka ee ka dhasho natiijada tartanka ama gorgortanka ka diiwan-gelisa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) ka dib marka ay ogolaanshaha ka hesho Waaxda Hantida Qaranka.
5. Marka la dhammeeyo burburinta agabka ee loo maray nidaamka iibinta, Hay'adda Dawladdu waa inay heshiiska lagu burburiyey agabka ka diiwaan gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), ka dibna waa in Agaasinka Dakhligu soo saaraa qaansheegta dakhli ururinta kaas oo lagu qaadayo dakhliga ka soo xarooday iibka agabka.
6. Dhammaan lacagaha ka soo xarooda iibka waa in lagu shubaa Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Qaranka iyadoo caddaynta lacag bixintana loo gudbinaayo Xisaabiyaha Guud si uu rasiidka lacag qabashada uga dhex ansixiyo Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).
7. Agab Dawladeed ee kasta oo duugow loo diwaan-galiyey waa in la burburiyo si waafaqsan habraacyada shuruucda iyo xeer-nidaamiyashu dhigayan.
8. Agab kasta oo Dawladded oo la burburiyey waa in si waafaqsan Qodobka kan ku xiga, laga tirtiraa Diiwaanka Hantida Qaranka, laga saaraa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) kaddib marka oggolaansho laga helo Waaxda Hantida Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud.

## Qodobka 11aad:
## Ka tirtirida Agabka La-burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka

1. Sarkaalka idman ee hay'adda agabka burburisay, ayaa codsiga ka tirtirida agabka la burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka usoo gudbinayo Waaxda Hantida Qaranka, Xisaabiyaha Guud iyo Hanti Dhoowraha Guud ee Qaranka marka:

   (b) Agabka Dawladdu uu si buuxda u qiima beelo, la xooro ama uu hawl-gabo, balse jiritaankiisu sii muuqdo.

   (t) Agabka Dawladda loo burburiyey si waafaqsan habraaca ku xusan Qodobka kore.

   (j) Hay'adda Dawladda ama Waaxda Hantida Qaranku ay xaqiijiyaan, warbixinna ku sheegaan in agabkaas lumay.

2. Haddii lagu ogaado baarista in lumitaanka ku yimid agabka uu sababay fal uu ula kac ah ee uu sameeyay sarkaalka mas'uulka ka ah, waxaa warbixinta baarista loo gudbinayaa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud si uu dacwad uga oogo Maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 12aad:
## Xisaabinta iyo Ka-warbixinta

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu soo saarayaa tilmaamo lagu qeexayo xeerarka xisaabinta, mabaadi'da iyo hababka ay Hay'adaha Dawladdu u xisaabinayaan qiimaha, qiimo-dhaca iyo khasaaraha ku yimaada hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.
2. Hay'adda Dawladdu waa inay warbixin sannadeedka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda gelisaa Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si nidaamku uu u soo saaro warbixin sannadeed dhamaystiran ee dhammaan hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.
3. Warbixin sannadeedka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda waa in lala wadaagaa:

   (b) Wasiirka, si uu u guto waajibaadkiisa ku aaddan maareynta maaliyadda guud;

   (t) Waaxda Hantida Qaranka si ay u isticmaalaan marka la fulinayo baaritannada iyo kormeerada xaqiijinta bad-qabka hantida danta-guud iyo agabka Dawladda.

   (j) Xisaabiyaha Guud si uu ugu adeegsado diyaarinta warbixinta xisaab-xirka (balance sheet) Dawladda.

   (x) Hanti-dhawrka Guud si uu ugu adeegsado baaritaannada hanti-dhawrista.

   (kh) Waaxda Miisaaniyadda si ay ugu adeegsado diyaarinta soo-jeedinta miisaaniyadda.
4. Warbixin sanadeedka dhamaystiran ee hantida danta- guud iyo agabka Dawladda (consolidated annual report) waa in lala wadaaga Labada Aqal ee Baarlamaanka JFS, isla marka Hanti-dhawrka Guud la wadaago Labada Aqal ee Baarlamaanka warbixinta xisaab-xirka ee baarista soo martay.
5. Waa in Waaxda Hantida Qaranka ay ku daabacdo mareegta (website) Wasaaradda, 15 (shan iyo toban) maalmood ka dib marka warbixinta lala wadaago Baarlamaanka, warbixin kooban oo laga soo saaray warbixin sanadeedka dhamaystiran ee ku xusan faqradda (4) ee qodobkan , si dadweynuhu u aqriyaan.
6. Hay'adda Dawladdu waa in ay warbixinta ku saabsan wixii isbeddel, burbur ama khasaare ah ee soo gaara hantida danta-guud ama agabka Dawladda oo ay mas’uulka ka tahay la wadaagtaa Waaxda Hantida Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud,

30 (sodon) maalmood gudahooda ka dib marka uu dhaco falka saameeyay hantida ama agabka.

7. Waaxda Hantida Qaranku waa in ay ogeysiisaa:

   (b) Xisaabiyaha Guud haddii ay jirto wax shuruud ah oo looga baahan in lala kulmo marka laga tirtiraayo agab la burburiyay Diiwaanka Hantida Qaranka.

   (t) Wasiirka haddii ay jirto codsi ku saabsan wareejin hanti dan-guud ama burburin agab Dawladeed.

   (j) Hanti-dhawrka Guud haddii ay jirto baahi loo qabo baaris hanti-dhawris oo ku saabsan hanti dan-guud ama agab Dawladdeed.

   (x) Xeer-ilaaliyaha Guud, haddii ay jirto dembi laga galay ama ka dhan ah hanti dan-guud ama agab Dawladdeed.

8. Waaxda Hantida Qaranku waxa ay waqti kasta codsan kartaa in ay xaqiijiso xaalada uu ku sugan yahay hanti dan-guud ama agab Dawladeed ama kormeerto hanti dan-guud ama agab Dawladeed. Waaxdu waxay sidoo kale u sameyn kartaa hawlaha xaqiijinta iyo kormeerka si lama filaan ah.

## QEYBTA AFARAAD

## MAAREYNTA AGABKA DAWLADDA

### **Qodobka** 13aad:
### Maareynta Gaarka u ah Agabka Dawladda

1. Wasiirka ayaa soo saaraya tilmaamo ku socda hay'addaha Dawladda oo ku aadan soo saarista habraacyo gudahooda ku eg oo ay ku maaraynayaan agabka Dawladda oo ay maamulaan. Tilmamaahan waa in ugu yaraan ay ka koobnaadaan:

   (b) Nidaamka diyaarinta qorshaha wax iibsiga ee sanadlaha ah si looga hortago in agab xad-dhaaf ah lasoo iibsado.

   (t) Habka dayactirka iyo keydinta agabka.

   (j) Habka loo maraayo qiimeynta agab ay soo iibsadeen, tirinta agabka kaydka ah, la socodka agabka iyo kaydinta diwaan sax ah ee agabka.

   (x) Habka la maraayo marka la wareejinaayo, la burburinaayo, ama laga tirtiraayo diiwaanka agab.

   (kh) Nidaamyada ilaalinta agabka iyo tallaabooyinka looga hortagayo xatooyada, khiyaanada, iyo isticmaalka qaldan.

   (r) Habka loo dhaqan-gelinayo xeerarka, habraacyada iyo tallabooyinka ku aadan maareynta agabka.

2. Hay'adaha Dawladda waa in ay Waaxda Hantida Qaranka u soo gudbiyaan habraacyo gudahooda ay u dajisteen ee lagu maareynayo agabka. Sidoo kale dukumeentiyadan waa in lala wadaaga Hanti-dhawrka Gudaha, iyo Hanti-dhawrka Guud marka ay codsadaan.

3. Maamulida agabka waa in loo raaco habka kala soocida ee uu dajiyay Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeer-nidaamiyeyaashiisa ama midka ku cad Nidaam-xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

## Qodobka 14aad:
## Soo Iibsiga Agabka

1. Sarkaalka idman ee Hay'ad Dawladeed waa inuu ku xussaa soo jeedinta miisaaniyadda ee hay'addiisa kharashka ku baxaya soo iibsiga agabka.

2. Ka hor inta aan la soo gudbin khiyaasta kharashka loo baahan yahay in lagu soo iibsado agab, Sarkaalka idman ee Hay'ada Dawladeed waa in uu hubiyaa:

   (b) In qarashka la khiyaasay in loo baahan yahay si loogu soo iibiyo agab uu waafaqsan yahay qabyo qoraalka qorshaha iibka sannadlaha ah. iyo

   (t) In iyadoo la raacayo habraaca gudaha ee Hay'addu jideeysatay si loogu maareeyo agabka si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobka 13aad, agabka yaala, walibana uu qiimeeya agabka loo baahanyahay iyo kuwa daruuriga ah.

3. Hay'addaha Dawladda waa in ay usoo iibsadaan agabka si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka ee Qaranka, xeer-nidaamiyaashiisa iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

4. Dhammaan agabka ay soo iibsato hay'add Dawladeed waa inuu hubiyaa sarkaal leh khibradda loo baahan yahay, isagoo:

   (b) Caddaynaya in agabku waafaqsan yahay dalabka iibka, qaan-sheegta, iyo dukumentiyada kale ee khuseeya. iyo

   (t) Xogta agabka lasoo iibiyay gelinaaya Diiwaanka Hantida Qaranka.

5. Marka gacanta lagu dhigo oo la diwaan galiyo dhammaan agabyada la soo gaarsiiyo hay’ad Dawladeed, Sarkaalka Idman waa in uu macluumaadka la wadaagaa Waaxda Hantida Qaranka, walibana:

   (b) Xaqiijiya nooca agabka isaga oo isla eegaya dalabka agabka, qaan-sheegta, iyo dukumentiyada kale ee khuseeya si loo hubiyo daahfurnaanta iyo saxsanaanta agabka.

   (t) Si degdeg ah u geliyo xogta agabka lasoo iibiyay Diiwaanka Hantida Qaranka isagoo kaydinaaya diiwaan dhammaystiran ee dhammaan agabka hay'adda Dawladda.

(j) Ka hela oggolaansho Waaxda Hantida Qaranka ee la xariirta codsiyada diiwaan-gelinta agabka cusub.

6. Sida ku cad Qodobka 13aad, Wasiirka ayaa soo saaraya tilmaamo ku socda Hay'addaha Dawladda oo ku aadan soo sarista habraacyo gudahooda ku eg oo lagu maareynayo agabkooda. Tilmaamahaan waa inay dhiiri-galiyaan hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee maamulka maaliyadda guud iyagoo:

   (b) Dhiiri-gelinaya isticmaalka hababka maareynta agabka ee daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka ku dhisan.

   (t) Fududeynaya samaynta habab cadcad ee ku aaddan xakamaynta agabka iyo kasoo warbixinta agabka.

   (j) Xaqiijinaya fulinta kormeerka iyo la socodka ku habboon tirada, isticmaalka iyo khaarajinta agabka.

   (x) Dhiiri-gelinaya wada-shaqaynta iyo macluumaad wadaagista Hay'adaha Dawladda dhexdooda si kor loogu qaado tayada nidaamyada maareynta agabka Dawladda.

**Qodobka** 15aad:
**Kaydinta Agabka Dawladda**

1. Sarkaalka idman ee Hay'adda waa in uu dhisaa, walibana joogteeya shaqada xarun kayd ah oo buuxin karta shuruudaha soo socda:

   (b) Xarunta kaydka ah waa in jawi ahaan ahaataa mid ku habboon kuna filan in lagu kaydiyo agabka Dawladda iyadoo xarunta kaydka ahi ka jawaabi karto baahida agabka lagu kaydinayo.

   (t) Xarunta kaydka waa inay lahaataa quful iyo nidaam sugan oo ilaalinaya bad-qabka agabka Dawladda.

   (j) Xarunta kaydka waa inay lahaataa qof maamula si uu u xakameeyo una maareeyo agabka Dawladda si waafaqsan habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka, gaar ahaan la wareegista agabka cusub, dayactirka, qoondaynta, burburinta , iyo ka tirtirida diiwaanka.

   (x) Xarunta kaydka waa inay lahaata diiwaanka kaydka si loogu diiwaan-geliyo sifooyinka muuqda iyo xogaha kale ee agabka iyo dayactirka si waafaqsan habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka.

2. Habraacyada gudaha hay'adda ee ku aaddan maareynta agabka waa inay ku jiraan siyaasado iyo hagayaal tilmaamaya sida agabka loogu kala qoondeynayo waaxyaha, xafiisyada iyo saraakiisha hay'adda iyadoo la hubinayo in:

(b) Agabka lagu bixiyo nidaam ku saleysan baahida jirta iyo in aan xaddi aan loo baahnayn aan la bixin.

(t) Qaataha agabku uu mas'uul ka yahay ilaalinta agabka lagalana xisaabtamayo wixii waxyeelo ah ama khasaare ah ee agab kusoo gaarta u hoggaansami la'aanta habraacyada maareynta agabka Dawladda ama dayacaad.

3. Sarkaalka idman ee hay'adda waa inuu u diyaariyaa inay arki karaan xarunta kaydka, diiwaanka hantida, diiwaanka kaydka, nidaamka maaraynta agabka, iyo agabka Dawladda, Xisaabiyaha Guud, Wasaaradda Maaliyadda, Hanti-dhawrka Gudaha, ama Hanti-dhawraha Guud marka ay ka codsadaan in ay arkaan.

## **Qodobka** 16aad:
## Habka Xaqiijinta iyo Hubinta Agabka

1. Sarkaal ka socda Waaxda Hantida Qaranka waa inuu ugu yaraan hal mar sannad kasta xaqiijiyaa agabka Dawladda, ama mar kasta oo ay xaalad keento in la xaqiiyo taas oo ku timid awaamiir kasoo baxday xafiiska Wasiirka. Ujeedada laga leeyahay xaqiijinta agabka waa in la hubiyo sidda loogu hoggaansan yahay dhammaan sharciyada, xeer-nidaamyada, iyo hab-raacyada lagu maamulayo maaraynta agabka Dawladda. Xaqiijintan waxaa ka mid ah in la xaqiijiyo jiritaanka agabka, lahaanshaha, xaalada uu ku sugan yahay, halka ay taalo, qiimaha ay taagan tahay, xadiga, heerka dayactirka, sida loo isticmaalo, haddi wax wareejin jirto iyo haddii hantida ay tahay mid la burburinayo oo duugawday.

2. Sarkaalka idman ee Hay'adda Dawladda waa in uu habraacyada xaqiijinta sameeyaa saddexdii biloodba mar, si loo adkeeyo habraacyada gudaha ee maareynta hantida.

## **Qodobka** 17aad:
## Maareynta Agabka Dawladda

1. Si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Iibka ee Qaranka iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa, Wasiirku wuxuu soo saaraya Hagaha Maareynta Agabka Dawladda oo jideeynaya nidaamyada la wareegista, diiwaan-gelinta, wareejinta iyo khaarajinta agabka Dawladda, si looga hortago in si xun loo isticmaalo ama la xado agabka Dawladda.

2. Marka uu dhaqan-galo Hagaha Maareynta Agabka Dawladda, dhammaan qodobada ku xusan Hagahaas waa in loo dhaqan-galiyo sida qodobadda Xeer-nidaamiyahan oo kale.

3. Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobbada kale ee ku jira Xeer-nidaamiyahan, haddii ay lagama-maarmaan noqoto, Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro hagayaal, siyaasado iyo habraacyo kaabayaal ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyahan

iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud. Ujeeddada hagayaasha, siyaasadaha iyo habraacyada ayaa ah in lasii faahfaahiyo, la sharaxo, lagana bixiyo hagis la taaban karo si loo dhaqan-geliyo Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, iyadoo kor loo qaadayo wax-ku-oolnimada iyo dhaqan-galka nidaamyada maareynta maaliyadda guud.

**Qodobka** 18aad:
**Dhaqan-galka Xeer-nidaamiyahan**

Xeer nidaamiyahaan wuxuu dhaqan-galayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirradda, isla markaana uu saxiixo Ra’iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.